



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Daturka

Dulmar ku saabsan Mawduuca Saddexaad Xoojinta Madaxbannaanida Garsoorka, Wax-ka-qabashada daldaloolada Dastuuriga ah, iyo Dib-u-dhiska Kalsoonida Dadweynaha

Garsoorka Soomaaliya wuxuu taagan yahay marxalad xasaasi ah oo leh fursado isbeddelo weyn oo taariikhi ah. Dalka weli waxa uu ku shaqeeyaa Dastuurka ku-meelgaar ah, waxaana weli la dhameystirin cutubyada muhiimka ahaa ee qeexayay qaab-dhismeedka, awoodaha, iyo madaxbannaanida garsoorka. Hubanti la'aantan dastuuriga ah waxa ay saameyn ku leedahay habka ay maxkamaduhu u shaqeeyaan, habka magacaabista garsoorayaasha, sida mas'uuliyadaha u dhexeeya heer federaal iyo heer dowlad-goboleed loo wadaago, iyo sida adeegga cadaaladda loo gaarsiiyo bulshada.

Garsoorku waxa uu wajahaya caqabado culus. Meelo ka mid ah dalka, maxkamaduhu ma haystaan nidaam hay'adeed oo qeexan si ay ugu shaqeeyaan si kalsooni leh oo sharciyad leh. Meelo kale, isku-qabsiga awoodaha, khayraadka oo kooban, iyo mugdiga ku jira sida awoodaha federaalka iyo dowlad-goboleedyadu u kala qaybsan yihiin ayaa abuuraya daldaloolo wiiqa waxtarka garsoorka. Saameyn siyaasadeed, cadaadis maamul, iyo habraacyo magacaabis oo aan is-waafaqsaneyn ayaa sii kordhinaya khatarta ku wajahan madaxbannaanida iyo kalsoonida nidaamka garsoorka.

Hase yeeshee, inkasta oo caqabadahan ay jiraan, Soomaaliya waxaa hortaalla fursad muhiim ah oo ay dib ugu qaabeyn karto garsoorka si uu u noqdo ilaaliye lagu kalsoon yahay ee talinta sharciga. Xoojinta madaxbannaanida garsoorku ma aha oo keliya dib-u-habeyn hay'adeed; waa ilaalinta karaamada maxkamadaha, hubinta go'aan-qaadasho caddaalad ah, iyo dhowrista xuquuqda dastuuriga ah ee muwaadiniinta. Arrintani waxay u baahan tahay magacaabis ku saleysan karti iyo waayo-aragnimo, mudda-xileed sugan, heerar anshax, iyo kala soocid awoodaha oo cad.

Dhanka kale, kor u qaadista waxqabadka garsoorka waa tiir lama huraan ah. Horumarinta xirfadda shaqaalaha, adeegsiga tignoolajiyada, habraacyo hufan, iyo nidaamyo casri ah oo maareynta dacwadaha ah waxay ka caawin karaan maxkamadaha inay noqdaan kuwo wax-ku-ool ah oo si wanaagsan uga jawaaba baahiyaha bulshada.

Ugu dambayn, dib-u-dhiska kalsoonida dadweynaha waa udub-dhexaadka dooddan. Muwaadiniintu waa inay garsoorka u arkaan meel lagu helo cadaalad, sharaf, iyo sinnaanta qof walba. Kalsoonida bulshada waxay korodhaa marka maxkamaduhu si joogto ah, hufan, kana madax-bannaan cabsi ama eex, u gutaan caddaaladda. Garsoor lagu kalsoon yahay wuxuu xoojiyaa nabadda, taageeraa talinta iyo ku-dhaqanka sharciga, isla markaana uu saldhig u noqdaa xasilloonida muddada fog ee dalka.

Su'aalaha Doodda

1. Madaxbannaanida Garsoorka

Waa maxay dib-u-habaynta wax-ku-oolka ah ee Soomaaliya hirgelin karto si loo ilaaliyo madaxbannaanida garsoorka, gaar ahaan dhanka magacaabista ku saleysan kartida, sugidda mudda-xileedka garsoorayaasha, iyo ilaalinta ka hortega faragelinta siyaasadeed ama tan maamul?

2. Isla-xisaabtan Garsoor Iyo Hufnaan

Sidee ayay Soomaaliya u xoojin kartaa habab kormeer garsoor iyo fulinta heerarka anshaxa oo hufan, si loo hubiyo in isla-xisaabtanku taageero xirfadda hawlwadeennada garsoorka (professionalism), iyada oo aan la waxyeelleyn madaxbannaanida garsoorayaasha?

3. Awoodda Hay'adeed ee Garsoorka

Waa kuwee daldaloollada awoodeed ee ugu badan oo caqabad ku ah in maxkamadaha Soomaaliya u shaqeeyaan si wax-ku-oolka ah, maxaase maalgashiyo bartilmaameedsan, sida tababar, tignoolajiyad, ama dib-u-habeyn qaab-dhismeed, oo loo baahan yahay si loo horumariyo waxqabadka garsoorka?

4. Kobcinta Kalsoonida Dadweynaha iyo Daahfurnaanta

Habraacyo nooc ah ayay hay'adaha caddaaladdu hirgelin karaan si kor loogu qaado daahfurnaanta, loo fududeeyo helitaanka macluumaadka, isla markaana loo dhiirrigeliyo kaqaybgalka bulshada, si dib loogu dhiso loona sii adkeeyo kalsoonida dadweynaha ee garsoorka?